

Ku Daabac Astaantaada Child Care Finder

Suuq-gey barnaamijkaaga oo ka caawi qoysaska inay helaan daryeel!

- Ku cusboonaysii boosaska bannaan wax ka yar 5 daqiiqo
- Muuji waxa ka dhigaya barnaamijkaaga mid gaar ah oo ka duwan
- Gacanta ku hay xogtaada



Child Care Finder waa madasha kaliya bilaashka oo heer gobol ah oo laga raadiyo daryeelka carruurta iyo waxbarashada hore ee Washington. Child Care Finder waxa uu leeyahay in ka badan 6,500 goobood oo bixiya daryeel iyo waxbarasho hore oo ku baahsan gobolka oo idil, isaga oo u adeegaya in ka badan 15,000 qoys sanad kasta.

Child Care Finder wuxuu awoodda geliyaa gacmaha bixiyeyaasha adeegga.

Ku xayaysii barnaamijkaaga si bilaash ah.

Child Care Finder waa madal suuqgeyn oo bilaash ah oo ka caawisa qoysaska inay ogaadaan barnaamijkiina oo ay wax badan ka bartaan daryeelka aad bixisaan.

Ka caawi qoysaska inay si dhakhso leh u helaan daryeel.

Child Care Finder wuxuu ku siinayaa lahaanshaha xogtaada, taas oo ka dhigaysa mid fudud in qoysasku ku arkaan marka uu boos kaa banaan yahay. Waalidiinta si firfircoon u raadinaya daryeel waxay si toos ah fariin ugu diri karaan bixiyeyaasha daryeelka si ay su'aalo u weydiiyaan, ugu biiraan liiska sugitaanka, ama u codsadaan booqasho indha-indheyn ah.

Muuji waxa ka dhigaya barnaamijkaaga mid gaar ah.

Tani waa fursaddaada aad kaga gudbi lahayd xog iska caadi ah. Waad gaaryeeli kartiin boggiina oo aad ka caawin kartiin qoysaska inay arkaan waxa ka dhigaya barnaamijkaaga mid gaar ah, soo dhawayn leh, oo ku habboon carruurtooda. Ku dar sawirro, taariikh nololeedka shaqaalaha, ama muuqaal soconaya si qoysasku u arkaan!



Samee cusboonaysiin degdeg ah oo fudud.

Waxaad dib u eegi kartaa boggaaga, cusboonaysiin kartaa boosaska bannaan, oo aad ku samayn kartaa wax ka beddellaadyo wax ka yar 5 daqiiqo gudaheed.



Sida Loo Daabaco Astaantaada:

1. Tag bogga providers.childcareawarewa.org oo geli cinwaanka iimaylkaaga.
2. Koodh ayaa loo diri doonaa cinwaanka iimaylkaaga. Geli koodkaas si aad u gasho wajiga hore ee Bogga Daryeel Bixiyaha.
3. Bogga hore markaad joogto, guji astaanta qalin-geedka si aad u aragto oo aad wax uga bedesho boggaaga.
4. Hubi inaad gujiso Publish. Mar kasta ayaad dib ugu soo laaban kartaa si aad u sii waddo shaqada boggaaga oo aad ugu darto macluumaad ka hor inta aan loo soo bandhigin qoysaska xagaagan!



Ma u baahan tahay caawimaad si aad u bilowdo?

Haddii aad u baahan tahay caawimaad gelitaanka, cusboonaysiinta boggaaga, ama daabacaadda macluumaadkaaga, wakhti kasta kala xiriir providersupport@childcareawarewa.org, ama la xiriir kooxdaada tababarka ee Early Achievers.

